

Warsidaha

# ISGAARSIIN

Lix biloodle ay soo saarto Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka



**SOOMAALIYA OO XUQUUQ  
ISGAARSIINEED DIB U HANATAY**

**Qorshaha Qaran Ee Isgaarsiinta  
Xaaladaha Degdegga ah**

**MADASHA QARAN EE  
AMNIGA INTERNETKA SOOMAALIYEED**



## Warsidaha **ISGAARSIIN**



**Sanadka 1aad  
Caddadka 2aad  
Luulyo - Diseembar, 2023**

**Cinwaan:**

-  : [info@nca.gov.so](mailto:info@nca.gov.so)
-  : <http://www.nca.gov.so>
-  : Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka
-  : @SomaliaNCA

# CINWAANADA

## WARSIDAHA



Soomaaliya oo dib u hanatay xuquuqdeeda Isgaarsiineed ee dayax-gacmeedka **Bogga 7**

HIQ oo si rasmi ah u daahfurtay Xarunta Howlaha Kormeerka Hirarka **Bogga 17**



Xeer-nidaamiyaha Xaqijinta Macaamilaadka Maaliyadeed & Hubinta Tayada Isgaarsiinta oo la anixiyay **Bogga 6**

Daahfurka Qorshaha Qaran ee Isgaarsiinta Xaaladaha Deg-degga ah **Bogga 31**



HIQ iyo hay'adda Tayo-dhowrka oo digniin soo wada saaray **Bogga 10**

Istiraatijiyada Jiilka 5aad (5G) oo la soo bandhigay **Bogga 23**

Qabashada madasha Qaran ee ugu horreysay ee Amniga Internet-ka **Bogga 14**



Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo ka qaybgashay shirar caalami ah **Bogga 26**

## Warsidaha ISGAARSIIN

### Warsidaha Isgaarsiin

Waa lix-biloodle ay soo saarto Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka. Waxaana lagu soo bandhigi doonaa waxqabadka hay'adda iyo wararka arrimaha Isgaarsiinta ee dalka.

### Cinwaan:

- @ : [info@nca.gov.so](mailto:info@nca.gov.so)  
🌐 : <http://www.nca.gov.so>  
📘 : Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka  
🐦 : @SomaliaNCA



*"Ka sokow inuu warsidahani inoo noqon doono goob aan ku ururino, ku keydino, kuna soo bandhigno waxqabadka Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, haddana wuxuu noqon doonaa goob laga dheehan doono gudashada waajibaadkeena iyo xilka aan u hayno ummadda Soomaaliyeed."*

*Mustafa Yaasiin*

# Ereyga Maareeyaha

Waxaa farxad weyn ii ah inaan idiin soo gudbiyo caddadkii labaad ee Warsidaha Isgaarsiin oo lixdii biloodba mar ay soo saarto Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ).

Waxaan aad ugu faraxsanahay inaan idin la wadaago waxqabadkii iyo guulihii lixdii bilood ee u dambeeyay ee ay ku talaabsatay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka kuwaasoo muujinaya sida ay nooga go'an tahay horumarinta isgaarsiinta dalka.

Bilihii Luulyo ilaa Diseembar waxqabadka iyo guulihii ugu muhiimsanaa waxaa ka mid ahaa dejinta Istaraatiijiyadda Jiilka shanaad (5G) ee Qaranka, furitaanka Xarunta Kormeerka Hirarka, qabashada madashii qaran ee u horreysay ee Amniga Internet-ka Soomaaliya, daahfurka Qorshaha Qaran ee Isgaarsiinta Xaaladaha Deg-degga ah, suuragelinta tababaro loo qabtay shaqaalaha HIQ.

Waxaa kaloo ka mid ah ansixinta Golaha Wasiirrada ee Xeer-nidaamiyaha Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo Hubinta Tayada

Isgaarsiinta, soo celinta xaqa ay Soomaaliya u leedahay in ay hesho kheyraadka meeraha dayax-gacmeedka baahinta isgaarsiinta iyo guulo kale kuwaasoo si faahfaahsan cadadkan labaad aad uga bogan doontaan.

Guulahani waxay markhaati u yihiin howlkarnimada, dadaalka iyo wadashaqaynta howlwadeennada HIQ oo dhan. Waxaan jeclaan lahaa inaan si kal iyo laab ah ugu mahadceliyo daneeyayaasheenna, saaxiibbadeen, iyo shaqaalaha HIQ oo kaalin weyn ku lahaa xaqiijinta yoolalkeenna.

HIQ waxaa ka go'an kobicinta hal-abuurka, hubinta sharciyada isgaarsiinta iyo horumarinta & nidaaminta suuqa Isgaarsiinta Soomaaliya.

Ugu dambeyntii waxaan u mahadcelinayaa Wasiirka Isgaarsiin & Teknolojiyada, Mudane Jaamac Xasan Khaliif, oo la'aantiis aysan suurageli lahayn waxqabadka iyo guulaha ay Hay'addu gaartay.

***Mahadsanidiin***

***Mustafa Yaasiin Sheekh  
Maareeyaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka***





## **GOLAHA WASIIRRADA**

# oo ansixiyay Xeer-nidaamiyaha Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed & Hubinta Tayada Isgaarsiinta

Nofeembar, 2023

Wasiirrada ayaa cod aqlabiyad leh ku ansixiyay 'Xeer-nidaamiyaha Xaqiijinta Macaamilaadka Maaliyadeed iyo Hubinta Tayada Isgaarsiinta,' kaas oo ay soo gudbisay Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada.

Xeer-nidaamiyahan ayaa looga gol leeyahay in la dhiso nidaamyo lagu korjoogteynaayo arrimaha la xiriira tayada adeegyada isgaarsiinta, la-socodka macaamilaadka shirkadaha isgaarsiinta, iyo xaqiijinta u-hoggaansanaanta shuruucuda isgaarsiinta iyo maaliyadda. Nidaamkan ayaa Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) u sahlaya inay hesho xog ku filan oo ay ku nidaamin karto suuqa isgaarsiinta, soona saari karto xeer-nidaamiyeyaal ku saleysan xog sax ah.

Xeer-nidaamiyahan ayaa u sahlaya hay'adaha dowladeed inay helaan xog sugan oo ku saabsan dhaqdhaqaaqada maaliyadeed ee shirkadaha isgaarsiinta si ay u sahlanaato in dowladdu ka hesho canshuuraha ku waajibay shirkadaha isgaarsiinta.

"Xeer-nidaamiyahan waa mid muhiim u ah dowladda. Ka sokow dhaqdhaqaaqada maaliyadeed, waxaa sidoo kale nidaamkan laga helayaa tirakooby badan oo haatan ay adag tahay inay Hay'addu hesho sida adeegsiga internetka, inta qof ee internet adeegsata, iwm, kuwaas oo wax weyn ka taraya qorsheyaasha dowladeed," ayuu yiri Maareeyaha HIQ, Md. Mustafa Yaasiin Sheekh.

Wasiirka Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada, Mudane Jaamac Xasan Khaliif, oo Golaha Wasiirrada u faahfaahiyay ayaa sheegay in xeer-nidaamiyahan ahmiyad weyn u leeyahay dalka, wax weyna ku soo kordhin doona sidii dowladdu canshuuraha ku waajibay uga heli lahayd shirkadaha isgaarsiinta.

Ansixinta xeer-nidaamiyahan ee Golaha Wasiirrada ayaa muujineysa ahmiyadda ay Dowladdu siineyso howlaha lagu horumarinayo isgaarsiinta iyo teknolojiyada dalka.

**Ansixinta xeer-nidaamiyahan ee Golaha Wasiirrada ayaa muujineysa ahmiyadda ay Dowladdu siineyso howlaha lagu horumarinayo isgaarsiinta iyo teknolojiyada dalka.**



# *Soomaaliya oo dib u hanatay*

## **XUQUUQDEEDA BAAHINTA ISGAARSIINTA EE DAYAX-GACMEEDKA**


**Diseembar, 2023**

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ayaa ku guulaysatay soocelinta xaqa ay Soomaaliya u leedahay in ay hesho khayraadka meeraha dayax-gacmeedka baahinta isgaarsiinta. Guushan, oo tilmaamaysa dhammaadka geeddi-socod adag oo socday muddo sanad ah, si waafaqsan ujeedooyinka qaraarka 559 ee Midowga Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU) waxa ay horumar u tahay dhinaca isgaarsiinta dalka.

Magaalada Dubai oo uu ka dhacay Shirweynaha Isgaarsiinta Raadiyaha Adduunka (20 Nofembar ilaa 15 Disember 2023) waxaa lagu qabtay munaasabad loogu dhabaaladagayo guusha ay 31 dal oo Afrikaan ah ka gaareen inay dib u hantaan kheyraadkooda dayax-gacmeedka ee ay hore u haysteen shirkado iyo dalal kale, iyadoo Soomaaliya ka mid tahay dalalkii ku guuleysatay inay dib ula wareegaan kheyraadkooda dhinaca isgaarsiinta dayaxgacmeedka.

“Ballanqaadkii iyo dadaalkii aan kala go'a lahayn ee aan sameynay sanadkii la soo dhaafay ayaa ku soo dhammaaday guushan, taasoo muujineysa sida aan ugu heellan nahay horumarinta isku-xirka iyo kaabayaasha teknoolajiyada dalka,” ayuu yiri Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Md. Mustafa Yasiin Sheekh.

Guushani ayaa horseedeysa in horumardheeriahlagagaarodhinaca isgaarsiinta dayax-gacmeedka, waxayna suurtoogelineysaa in dayax-gacmeedka looga faa'iideysto



sidii isgaarsiinta loo gaarsiin lahaa dalka oo dhan. Waxay sidoo kale u gogol xaaraysaa xoojinta iskaashiga caalamiga ah ee isgaarsiinta, gaar ahaan dalalka Afrika. Soocelinta kheyraadka dayax-gacmeedka waxay horumar weyn ku soo kordhin doontaa qeybaha isgaarsiinta, warbaahinta, iyo guud ahaan dhaqaalaha dalka.

“Waxaan soo dhoweynayaa guusha dalkeenu ka gaaray soocelinta kheyraadka baahinta ee dayaxgacmeedka isgaarsiinta. Waxaana ku ammaanayaa hay'adda iyo kooxdii ka shaqeysayba guushan taariikhiga ah iyo inaan ka mid noqonno 31ka dal ee Afrika ee ka soo gudbay halbeegyadii la asteeyay,” ayuu yiri Wasiirka Isgaarsiinta & Teknoolijiyadd Soomaaliya, Mudane Jaamac Xasan Khaliif.

Guushan laga gaaray baahinta isgaarsiinta dayaxgacmeedka ayaa ka dhigan waa cusub oo u baryay adeegyada ku shaqeeya isgaarsiinta iyo teknoolajiyada, taas oo saameyn toos ah ku yeelan doonta geeddi-socodka horumarka qaranka.

# SAHANKA QIIMAHA ADEEGYADA ISGAARSIINTA DALKA 2020-2023

## Hordhac

Qiimaha adeegyada isgaarsiineed waa muhiim si loo sameeyo xiriirka ka dhexeeya dalabaadka iyo bixinta, dakhli-abuurka iyo daboolidda kharashaadka adeegyada, gaarsiinta macluumaadka adeegga iyo helidda madal lagu tartamo.

Waxaa jira habab kala duwan oo lagu qiimeeyo adeegyada isgaarsiinta sida:

1. Qiimaynta ku salaysan baahida: Qiimaynta iyadoo loo eegayo waxa macmiilku awoodo inuu bixiyo.
2. Qiimaynta ku salaysan qiimaha: Qiimaynta iyada oo loo eegayo kharashka adeegga lagu bixinayo, qiimaha noocan ah waxaa laga helaa deegaan nidaamsan.
3. Qiimaha ku salaysan suuqa: Qiimaynta si loola tartamo shirkadaha kale ee suuqa, qiimaha noocan ahi waxa uu ka jiraa suuq tartan ah.

Aragtida dhaqaalaha marka loo eego, tartanka suuqa xorta ah ayaa la filaa inuu horseedo qiimo jaban oo lagu qiimeeyo qiimaha isgaarsiinta, haddii ay taasi fashilanto, hay'adaha sharci ee Qaranka u qaabilsan isgaarsiinta ayaa loo xilsaaray inay nidaamiyaan qiimaha isgaarsiinta.

Marka loo eego qodobka 2aad ee Sharciga Isgaarsiinta Qaranka ee 2017, ujeedooyinka sharcigaas waxaa ka mid ah “fududeynta iyo abuuridda iibka casriyeysan ee ku saleysan adeegga isgaarsiinta.”

Sidoo kale qoddobka 6aad ee Sharciga Isgaarsiinta Qaranka ee awoodaha iyo waajibaadka Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka na waxaa ka mid ah “talo-ka-bixinta qiimaha tariifadaha, lambarrada iyo kobcinta tartanka isgaarsiinta”

Adeegyada Isgaarsiinta ee Soomaaliya ka jira waa kuwa kala duwan waxaana ka mid ah:

1. Iibsashada SIM Kaar (SIM Card) si aad u hesho adeegyada Isgaarsiinta.
2. Wicitaanada gudaha ah
3. Farriimaha qoraalka (SMS) gudaha ah
4. Wicitaannada Caalamiga ah
5. SMS caalami ah
6. Adeegga Internet-ka ee Mobilka
7. Iyo xirmooyinka wicitaannada gudaha, wicitaannada caalamiga ah, SMS-ka iyo adeegga Internet-ka oo keli keli ah ama isku-dar ah

## Qiimaha Adeegyada Isgaarsiinta ee la awoodi karo

### Soomaaliya kaalinta 2-aad ayay ka gashay adeegsiga Internet Mobile-ka Adduunka oo dhan

Qiimaha adeegyada Isgaarsiinta ee Soomaaliya ayaa ka mid ah kuwa ugu jaban Afrika iyo Adduunka, sida 2020kii lagu sheegay daraasad lagu daabacay Cable.co.uk.

Soomaaliya ayaa ka gashay kaalinta toddobaad dalalka internet-ka ugu jaban adduunka iyadoo 1GB ay ku kacayso celcelis ahaan \$0.50 oo keliya. Sannadkii 2019, Soomaaliya waxay gashay kaalinta 13aad iyadoo celcelis ahaan 1GB uu qiimihiisu ahaa \$6.19.

Tirakoobkii ugu dambeeyay ee ay soo saartay Midowga Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU) ayay Soomaaliya kaalinta 2-aad ka gashay marka la eego adeegga Internet Mobile-ka iyo isticmaalka yar ee codka (70 daqiiqo + 20 SMS + 500 MB), halka sannadkii 2021 ay Soomaaliya gashay kaalinta tobnaad.


Sidoo kale isla tirakoobka ayay Soomaaliya ayaa ka gashay kaalinta afaraad marka loo eego isticmaalka badan ee codka iyo adeegga internetka moobilka (140 daqiiqo + 70 SMS+ 2 GB), halka sanadkii 2021 Soomaaliya ay gashay kaalinta 15aad.

Tirakoobka ay sameysay Midowga Isgaarsiinta Caalamiga ah ayay sidookale Soomaaliya ka gashay kaalinta 9aad marka loo eego adeegga internet-ka xawaaraha sare (broadband) (2G), iyadoo sanadkii 2020-ka ay Soomaaliya ka gashay kaalinta 32-aad.


# Qiimaha Adeegyada Isgaarsiinta ee la awoodi karo

Qiimaha la ururiyey ee adeegyada Isgaarsiinta Soomaaliya intii u dhaxeysay 2020- 2023 waa sidan hoos ku qoran; hase ahaatee xogtan waxaa lagu soo ururiyay la tashi lala sameeyay shirkadaha Isgaarsiinta Shatiga leh iyo cilmi baaris ay sameeyeen koox ka tirsan Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, iyadoo la adeegsanayo qoddobka 16aad ee Sharciga Isgaarsiinta Qaranka.


**Jaantus 1:**  
**Qiimaha SIM Kaarka**




**Jaantus 2:**  
**Qiimaha SIM kaararka VIP-da ah**




**Jaantus 3:**  
**Qiimaha Daqiiqadaha Wicitaanka Gudaha ee US\$1**




**Jaantus 4:**  
**Qiimaha Daqiiqadaha Wicitaanka Caalamiga ah ee US\$1**




**Jaantus 5:**  
**Qiimaha SMS-ka Gudaha ee US\$1**




**Jaantus 6:**  
**Qiimaha SMS-ka Caalamiga ah ee \$1**



**Jaantus 7:**  
**Qiimaha Xirmada Wicitaanka Gudaha ee \$1**



**Jaantus 8:**  
**Qiimaha Internetka GB ahaan ee \$1**



# DIGNIIN

## HAY'ADAHA

Isgaarsiinta iyo Tayo-dhowrka oo digniin soo wada saaray



*Bidix: Marwo Xaawo Xasan, Maareeyaha HTS, Mudane Xuseen Culusow, Wasiir Ku-xigeenka WI&T iyo Mudane Mustafa Yaasiin Maareeyaha HIQ*

**Luulyo, 2023**

Hay'adaha qaran ee kala ah Isgaarsiinta iyo Tayodhowrka ayaa ku wargeliyay dhammaan shirkadaha isgaarsiinta iyo internetka inaan dalka la soo gelin karin qalab isgaarsiineed ama teknolojiyadeed oo aan haysan oggolaanshaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) iyo Hay'adda Tayodhowrka Soomaaliyeed (HTS).

Ogeysiiska, oo waafaqsan qoddobka 59-aad ee Sharciga Isgaarsiinta, waxa uu xoogga saarayaa muhiimadda ay leedahay in loo hoggaansamo xeerarkan si loo xaqiijiyo suuq caddaalad ah oo lagu tartamo, loona ilaaliyo macaamiisha iyo shacabka Soomaaliyeed.

Warkan ayaa soo baxay kaddib markii labada hay'adood ay si wadajir ah u qabteen munaasabad ay ku kala saxiixanayeen isfargarad ay labada

dhinac isaga kaashanayaan sidii loo xaqiijin lahaa tayada qalabka isgaarsiinta iyo teknolojiyada.

Waxaa munaasabadda goobjoog ka ahaa Mudane Xuseen Culusow, Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada. Isafgaradkan waxaa HIQ u saxiixay Maareeyaha Guud, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, halka HTS ay u saxiixday Maareeyaha Guud, Marwo Xaawo Xasan.

"Dhammaan qalabka isgaarsiinta - iyadoon loo fiirin meesha uu ka yimid - waa inay maraan nidaamka oggolaanshaha looga baahan yahay ee Hay'adda," ayuu yiri Md Mustafa Yaasiin Sheekh, Maareeyaha Guud ee HIQ. Nidaamkan 'Hubinta Qalabka (Type Approval)' wuxuu hubinayaa in qalabku buuxiyay heerarka tayo ee loo baahan yahay oo ah in aanu keenin khataro caafimaad oo suurtagal ah ama inuu shucaac ku furo



adeeg-bixiyeyaasha kale."

Ogeysiiskan wuxuu sidoo kale intaas ku darayaa in qalab kasta oo isgaarsiineed oo hadda la isticmaalo, oo aan wali HIQ rukhsad ka helin, ay tahay in si degdeg ah loogu soo gudbiyo si shahaadada oggalaanshaha loo helo.

Ku-guuldarreysiga in loo hoggaansamo nidaamkan waxa ay jebinaysaa sharciga, waxayna sababi kartaa carqalad weyn oo ku timaadda guud ahaan kaabayaasha isgaarsiinta.

"Waxaa muhiim ah in la fahmo in qalab kasta oo isgaarsiineed oo ay maalgeliyaan shirkadaha Isgaarsiinta iyaga oo aan oggolaansho sax ah ka haysan Hay'adda loo aqoonsan doono sharci darro," ayuu yiri Md Mustafa Yaasiin, Maareeyaha Guud ee HIQ.



"Hay'addu waxay qaadi doontaa tallaabooyinka lagama-maarmaanka ah si loo hubiyo u-hoggaansanaanta, oo ay ku jiri karaan ganaaxyo, iyo xitaa kala-noqoshada rukhsadda, marka loo arko inay habboon tahay."

Shirkadaha isgaarsiinta waxaa sidoo kale lagu wargelinayaa in HIQ aysan mas'uul ka noqon doonin wixii khasaaro ah oo ka yimaada isticmaalka sharcidarrada ah ee qalabka aan la fasixin, oo ay ku jiraan teknoolajiyadda cusub, sida 5G. Waa mas'uuliyadda shirkadaha Isgaarsiinta iney u hoggaansamaan heerarka iyo tilmaamaha la ansixiyay si loo ilaaliyo hufaanata iyo xasilloonida shabakadda isgaarsiinta.

HIQ waxay ku dhiirrigelinaysaa dhammaan shirkadaha isgaarsiinta ee shatiga leh inay dib u eegaan agabkood isgaarsiinta oo ay billaabaan tallaabooyinka lagama-maarmaanka ah si loo hubiyo u hoggaansanaanta shuruudaha sharciyada.

# HIQ

oo u dabaaldegtay


## Maalinta Xorriyadda Soomaaliyeed

Luulyo, 2023

Qaar ka mid ah shaqaalaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ayaa Garoonka Kubadda Cagta Muqdisho kaga qeybgalay munaasabadda 1-da Luulyo oo ku asteysan sannad-guuradii 63-aad ee ka soo wareegtay markii ay xoroobeen Gobollada Koonfureed ee dalka iyo Israacii Gobollada Waqooyi iyo Koonfur.

Munaasabadda ayaa waxaa ka soo qeybgalay kumanaan shacab ah, shaqaallaha dowladda iyo masuuliyiin kala duwan oo uu hoggaaminaayay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Xasan Sheekh Maxamuud.

Madaxweynaha oo ka hadlay munaasabadda ayaa diiradda saaray xaaladda dalka, sooyaalka dadka Soomaaliyeed ee la dagaallanka gumeysiga iyo hiigsiga ku aaddan dhismaha qaran ka tilmaaman gobolka iyo qaaradda.



# Habka Cabashada *Macaamiilka*

**1** **Ma**cmiil kasta oo ka mid ah isticmaalayaasha adeegga isgaarsiinta ee shatiyeysan ayaa waqti walba soo gudbin kara cabasho qoraal ah iyaga oo isticmaalaya bogga rasmiga ah ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka <https://nca.gov.so/>

**2** **Ma**caamiisha waxaa looga baahan yahay inay buuxiyaan foomka cabashada macmiilka ee ku xusan mareegta (website) Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) si ay u gudbiyaan cabashadooda.

**3** **Fo**omka cabashada macmiilka waxa uu uga baahan yahay macaamiisha inay ku buuxiyaan macluumaadkooda si ay u helaan jawaabta cabashadooda.

**4** **Fo**omka Cabashada Macmiilka sidoo kale waxa uu uga baahan yahay macaamiisha inay doortaan liiska cabashooyinka suurtagalka ah iyo caddaynta cabashada.

**5** **Ma**caamiisha leh baahiyaha gaarka ah waxay isticmaali karaan lambarka rasmiga ah ee Hay'adda ama sida ugu fudud ee la heli karo.

**6** **Ha**y'addu waxay baari doontaa cabashada iyadoo la kaashanaysa Adeeg bixiyaha ay khusayso lana tixgalinaayo Sharciga Isgaarsiinta Qaranka, Xeerarka HIQ iyo Sharciyada kale ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**7** **Ma**caamiishu waxay jawaabta ku helayaan 10 maalmood gudahood oo ah maalmaha shaqada ah.

**8** **Ja**waabtu waxay noqon doontaa caddaymo ama magdhow ama tallaabo la qaadayo.

# Madasha Qaran Ee Amniga Internetka



Oktoobar, 2023

Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada iyo Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ayaa si wadajir ah u soo qabanqaabiyey madashii ugu horreysay ee Amniga Internet-ka Soomaaliya kaas oo halku-dhig looga dhigay "Sugidda & Badbaadada Mustaqbalka Dijitaalka Soomaaliya".

Munaasabadda oo ka dhacday Hotel Jazeera, ayaa waxaa isugu yimid mas'uuliyiin ka kala socotay Dowladda, Qeybta Isgaarsiinta & Teknolojiyada, Bangiyada iyo Urrrada Bulshada Rayidka ah, iyadoo tani ay ka dhigan tahay guul muhiim ah oo Soomaaliya ay kaga go'an tahay sare u qaadidda tallaabooyinka lagu xoojinta amniga internetka.

Inta ay munaasabaddu socotay, waxaa madasha lagu soo bandhigay khudbado kala duwan iyo kulamo cilmiyeedyo, iyadoo si qoto-dheer looga dooday caqabadaha iyo fursadaha lagu xaqiijinayo amniga dijitaalka ah ee Soomaaliya.

Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, ayaa khudbaddiisa kaga hadlay muhiimadda amniga internetka, wuxuuna yiri "HIQ waxay aqoonsan tahay khataraha ka dhalan kara adduunyada isku-xiran ee sii kordhaysa. Waxaa naga go'an inaan si dhow ula shaqeyno dhammaan dadka ay khuseyso si aan u horumarino qaab-dhismeedyada amniga



internetka oo adag, kor loogu qaado wadaaga macluumaadka, iyo horumarinta awoodaha farsamo si loo xaqiijiyo adkeysiga nidaamka deegaanka ee dhijitaalka ah ee dalka."

Wasiirka Isgaarsiinta & Teknoolajiyada, Mudane Jaamac Khaliif, aya bogaadiyay Madasha, waxa uuna sidookale ku dheeraaday muhiimadda ay leedahay madashan, isagoo yiri: "madaama annu cagta saarnay wadadii dhijitaaleynta waa in aan mudnaanta siinaa amniga internetka si aan u ilaalino kaabayaasha muhiimka ah ee qarankeena una sugno mustaqbalka dhijitaalka ah ee muwaadiniinteena.

Madasha Qaran ee Amniga Internetka ee Soomaaliya waxay suuragalineysaa fagaare wada-shaqeyn iyo wada-hadal lagu yeelan karo si loo xoojiyo dadaalladeenna ku aadan arrintan muhiimka ah."

Madasha Qaran ee Amniga Internetka Soomaaliya waa tallaabo lagama maarmaan u ah dhanka abuurista wacyigelinta iyo horumarinta istaraatiijiyad la xiriirta amniga internetka dalka. Iyadoo la isu keenayo daneeyayaasha ka kala socda dowladda, qeybta isgaarsiinta & teknoolajiyada, bangiyada iyo ururada bulshada rayidka ah, madashan aya ujeeddadeedu tahay in Soomaaliya ay si wanaagsan ugu diyaargarowdo sidii ay wax uga qaban lahayd xaaladda amniga ee dhanka internetka.



Maareeyaha Guud ee HIQ oo ka qeybgalay

## Shirka Xirfadleyda Teknolojiyada

Oktoobar, 2023

Maareeyaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, ayaa ka mid ahaa marta sharafta ka qeybgashay shirka xirfadleyda Teknolojiyada (Somali Network Operators Group), kaas oo lagu qabtay magaalada Muqdisho 25kii ilaa 26kii Oktoobar ee sannadkan.

Madashan, oo ay ka qeybgaleen masuuliyiin iyo xirfadleyda teknolojiyada, ayaa sannadkan mawduucyada diirada lagu saarayay uu ahaa dariiqa ay Soomaaliya u marayso isbeddelka dhijitaalka ah.

Mudane Mustafa, oo ka mid ahaa marti sharaftii hadalka ka jeediyey madasha, ayaa ugu horreyntii iftiimiyeey doorka muhiimka ah ee qaybta isgaarsiinta & teknolojiyada ay ku leedahay qaabeynta mustaqbalka dhijitaalka ah ee Soomaaliya, isaga oo yiri: “sharaf weyn bay ii tahay inaan kamid noqdo marti sharafta shirkan, oo khabarro iyo siyaasad-dejiyaal badan ay iskugu yimaadeen. Madashan waxay fursad gaar u tahay maanshiilka doodaha la xiriira horumarinta iyo casriyenta kaabayaasha isgaarsiinta & teknolojiyada dalka.”

Maareeyaha ayaa sidookale carrabka ku adkeeyey sida ay uga go'an tahay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka in ay xaqiijiso hannaan adag oo lagu maamulayo horumarinta tartanka suuqa, maalgashiga iyo hubinta adeegyo tayo sare leh oo ay helaan shacabka Soomaaliyeed.

Ugu dambeyntii waxa uu maareeyuhu dhiirigaliyay iskaashi dhexmara daneeyayaasha si looga gudbo caqabadaha loogana faa'iidaysto fursadaha dhijitaalka ah, isagoo yiri “dadaalada iskaashiga iyo wadajirka ah ee qaybta Teknolojiyada waa muhiim, waxay u gogol xaarayaan sidii Soomaaliya loo heli lahaa teknoolojiyad awood leh taasoo kobcisa hal-abuurka, horumarisa kaabayaasha dhaqaalaha isla markaana awoodsiisa muwaadiniinta.”





**Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ayaa si rasmi ah u daahfurtay Xarunta Howlaha Kormeerka Hirarka, taasoo ah tallaabo muhiim ah oo loo qaaday dhanka xoojinta maamulka hirarka iyo xaqiijinta tayada isgaarsiinta Soomaaliya.**

# XARUNTA KORMEERKA HIRARKA

**Oktoobar, 2023**

Munaasabadda lagu daahfurayay xaruntan oo lagu qabtay xarunta dhexe ee HIQ ayaa waxaa ka soo qeyb galay Wasiirka Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada, Maareeyaha Guud ee HIQ, Maareeye Ku-xigeenka Guud ee HIQ iyo marti sharaf kale.

Xarunta Kormeerka Hirarka waxay udub-dhexaad ah u noqon doontaa la-socodka iyo falanqaynta isticmaalka hirarka, ogaanshaha dhaqdhaqaaqyada sharci darrada ah, iyo xallinta arrimaha isdhexgalka/faragelinta hirarka. Qalabka Xarunta oo awood u leh kormeerka noocyada kala duwan ee hirarka, waxaa laga heli doonaa macluumaad caawin doono sidii loo gaari lahaa go'aamo la xiriira in si hufan loo qoondeeyo hirarka oo ka mid ah kheyraadka ugu muhiimsan isgaarsiinta.

Mudane Mustafa Yaasin Sheikh, Maareeyaha Guud ee HIQ, ayaa sheegay inuu aad ugu faraxsan yahay furitaanka Xarunta Kormeerka Hirarka, isagoo yiri "Xaruntan waxay wax badan ka beddeli doontaa la-socodka iyo maareynta kheyraadka hirarka dalkeena. Iyadoo si xawli ah loo ballaarinayo kaabayaasha isgaarsiinta dalka iyo kororka teknolajiyada aan xargaha lahayn (wireless), waxaa muhiim ah kormeerka hirarka si loo xaqiijiyo in adeegyada isgaarsiinta aysan kala-go' yeelanin, isla markaana looga hortago isdhaxgalka hirarka, taas

oo ugu dambeyn horseedeysa in sare loo qaado tayada adeegyada la siiyo macaamiisha."

Wasiirka Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada, Md. Jaamac Xasan Khaliif ayaa sidoo kale ka hadlay muhiimadda ay xarunta kormeerka hirarka u leedahay fududaynta kobaca iyo horumarinta isgaarsiinta, isagoo yiri "Daahfurka Xarunta Kormeerka Hirarka waa tallaabo muhiim ah oo lagu gaarayo himiladeena la xiriirta qaran dhijitaal ahaan isku-xiran.

Xaruntani waxay kor u qaadi doontaa awoodaha maamulka hirarka, taasoo horseedi doonta horumarinta tayada adeegga, kororka hal-abuurka iyo kor-u-qaadista tartanka Isgaarsiinta."

Iyadoo la dhisayo Xarunta Kormeerka Hirarka, Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka waxay ku celinaysaa sida ay uga go'an tahay abuurista jawi awood leh oo ku habboon isgaarsiinta, horumarinta hal-abuurka, iyo dhiirrigelinta tartan caddaalad ah. Daahfurka xarunta waxay astaan weyn u tahay dadaalka joogtada ah ee HIQ ee kor loogu qaadayo awoodaha maaraynta hirarka iyo hubinta in muwaadiniintu ay helaan adeegyo isgaarsiineed oo aan kala-go' lahayn.



# Xarunta Xogta Qaranka *oo la dhagax dhigay*

**Nofeembar, 2023**

Wasiirka Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada, Mudane Jaamac Xasan Khaliif, ayaa si rasmi ah u dhagaxdhigay dhismaha Xarunta Xogta Qaranka (National Data Center) oo ay leedahay dowladda Soomaaliyeed.

Dhismaha Xaruntan waxay xoojineysaa adeegyada teknolojiyadeed ee ay bixiyaan hay'adaha dowladda, waxaana loogu talagalay inay martigeliso xogaha kala duwan ee ay ku shaqeeyaan hay'adaha dowladda ee bixiya

adeegyada la xiriira teknolojiyadda.

Xaruntan ayaa marka la dhammeystiro dhismaheeda iyo qalabeynteedaba, waxay meel isugu keeni doontaa xarumaha xogta ee ay leeyihiin qaar ka mid ah hay'adaha dowladeed, iyadoo fursad u siin doonta inay qalabkooda keensan karaan xaruntan maaddaama xaruntan ay ku taallo goob istaraatiiji ah oo marin u ah xargaha internetka ee dalka yimaada.





Marka la hirgeliyo xaruntan waxay meel isugu keeni doontaa xogaha qaranka, taasoo fududeyn doonto adeegyada dowladda ee ay u fidiso shacabka (government to citizens), adeegyada dowladdu ay u fidiso ganacsatada (government to business) iyo adeegyada ka dhexeeya hay'adaha dowladeed (government to government).

Maareeyaha Guud ee HIQ, Mudane Mustafa Yaasiin, oo munaasabadda ka hadlayay ayaa sharraxay kaalinta muhiimka ah ee xarumaha xogtu ku leeyihiin buuxinta baahida bulshada, isagoo si gaar ah u xusay in adeegyada teknolojiyadeed ee dalka ay haatan si xawli u kordhayaan.



"Xaruntan castriga ah waxay xoojin doontaa oo aasaas u noqoneysaa adeegyada teknolojiyadeed ee dalka, iyadoo buuxin doonta baahida sii kordheysa ee martigelinta iyo habaynta xogta dhijitaalka ah," ayuu yiri.

Wasiirka Isgaarsiinta iyo Teknoolajiyada Mudane Jaamac Xasan Khaliif, oo dhagaxdhigay xarunta, ayaa xusay inay guul tahay in la soo gaaray dhagaxdhigga xaruntan.

Wasiirku wuxuu xusay in xogta dalka oo lagu hayo dalka gudahiisa ay tahay guul weyn oo la gaaray, maadaama markii hore xogaha dalka lagu keydin jiray dalka dibeddiisa oo keliya.

Ugu dambeyntii, wasiirku wuxuu ugu baaqay dhammaan hay'adaha dowladda ee haya xog dhijitaalka ah inay ka faa'iideystaan xaruntan oo dhismahaada iyo qalabkeeduba noqon doonaan heerarka ugu sarreeyay xarumaha xogta



# FALCELINTA ADEEGGA ISKU XIRKA

## HORUDHAC

Midowga Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU) wuxuu ku qeexay isku-xirka adeegyada isgaarsiinta “hababka sharci, farsamo iyo shaqo ee ka dhexeeya shirkadaha isgaarsiinta, si loo dhiso xiriirka ka dhexeeya macaamiisha hal shabakad iyo macaamiisha shabakadaha kale”.

Adeegga Isku-xirka isgaarsiintu waa dan qaran sida uu dhigayo Sharciga Isgaarsiinta Qaranka. Adeegga isku-xirka isgaarsiinta ayaa sidoo kale lama huraan u ah soo gelida suuqa ee shirkadaha isgaarsiinta iyo taabagelinta tartanka suuqa xorta ah.

Macaamiisha isgaarsiineed ee Soomaaliya ayaa in muddo ahba loo diiday xuquuqii iyo awoodii ay kula xiriiri lahaayeen dadka isticmaala shabakadaha kala duwan ee isgaarsiinta Soomaaliya, taasoo keentay dhibaatooyin iyo caqabado badan oo soo wajaha macaamiisha, waxaana ka mid ah in macaamiisha lagu qasbay inay iibsadaan dhowr SIM- CARD, si uu ula xiriiro dhammaan shirkadaha kala duwan ee ka howlgala Soomaaliya.

Dadaallo lagu hirgelinayo adeegga isku-xirka oo soo billowday sannadkii 2017-kii, xilligaasoo dowladda Soomaaliya ay meel marisay Sharciga Isgaarsiinta Qaranka, kaasoo faraya dhammaan shirkadaha bixiya adeegga isgaarsiinta in ay isku-xirmaan.

Sanadkii 2018-ka waxaa la aas'aasay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), iyadoo dhismaha Hay'adda ay ka mid tahay waxyaabaha mudnaanta u leh hirgelinta adeegga isku-xirka.

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ayaa si hufan uga shaqaysay:

- Dejinta qaab-dhismeedka xeer, ganacsi, iyo kan sharci ee hirgelinta Isku-xirka.
- Qabanqaabinta dhowr shirar wada-tashi oo ah ku dhawaad 15 shirar, oo ay shirkaduhu kaga hadlayeen caqabadaha, arrimaha la xiriira adeegga isku-xirka iyo siyaabaha suurtagalka ah ee loo xalin karo.
- Abaabulka dhowr aqoon-is-weydaarsiyo iyo kobcinta aqoonta shirkadaha isgaarsiinta, iyadoo shirkaduhu ay fursad u heleen inay khubarada caalamiga ah kala hadlaan siyaabaha suurtagalka ah ee loo hirgelin karo adeegga isku-xirka.


Dadaal baaxad leh oo ay sameeyeen Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) iyo shirkadaha isgaarsiinta awgeed, ayaa bishii Febraayo 2023 lagu guuleystay daahfurka adeegga isku-xirka. Bishii Agoosto 2023, oo ku beegnayd 5 bilood ka dib markii la daahfuray adeegga isku-xirka, ayay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka soo qabanqaabisay Sahanka Falceliska Adeegga Isku-xirka Shirkadaha Isgaarsiinta iyadoo ujeedooyinka ay ka lahaydna ay kamid ahaayeen:

- Si loo cabbiro saamaynta adeegga isku-xirka oo ku leeyahay macaamiisha.
- Si loo aqoonsado faa'iidooyinka iyo khasaarooyinka adeegga Isku-xirka ee hadda jira.
- Si kor loo qaado wacyiga macaamiisha Soomaaliyeed ee ku aaddan isticmaalka adeegga isku-xirka.


Sahanka ayaa loo sameeyay qaab toos ah iyo qaab internetka ah iyada oo la adeegsanayo aaladaha warbaahinta bulshada iyo foomamka Google.

## Natijiyooyinka Sahanka


### J1: Xirfadda Macaamisha ka jawaabay falcelinta




### J2: Nooca isgaarsiinta ay macaamisha isticmalaan




### J3: Ka warqabka macaamiisha ee adeegga isku-xirka



### J4: Helidda xogta adeegga isku-xirka ee macaamiisha




### J5: Ku qanacsanaanta macaamiisha ee adeegga isku-xirka




### J6: Isticmaalka macaamiisha ee adeegga isku-xirka




### J7: Faa'iidada macaamiisha ee hirgelinta adeegga isku-xirka



### J8: Isticmaalka macaamiisha ee adeegga isku-xirka



### J9: Caqabadaha macaamiisha ee hirgelinta adeegga isku-xirka



waxay sababi kartaa mustaqbalka dhow macaamiishu in ay isticmaalin oo ayna ka faa'iidsan adeegga isku-xirka, hase ahaatee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ayaa qabanqaabineysa kulumo dib u habeyn loogu sameynayo qiimaha adeegga Isku-xirka.

Caqabadda qiimaha adeegga isku-xirka waxaa lagu xalin karaa in shirkadaha isgaarsiintu ay hoos u dhigaan qiimaha (OFF-NET) iyo in ay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ay hoose u dejiso qiimaha isku-xirka (MTR). Tani waxay kordhinaysaa isticmaalka adeegga isku-xirka, waxayna siin doontaa dakhli dheeraad ah shirkadaha Isgaarsiinta.

Caqabadaha kale ayaa ah tayada adeegga isku-xirka iyo ka warqab la'aanta macaamiisha ee hirgelinta adeegga isku-xirka iyo sida loo isticmaalo adeegga isku-xirka. Adeegga isku-xirka hadda jira wuxuu adeegsadaa xiriirka IP-ga, hirgelinta isku-xirka ee Fiber-ka wuxuu si weyn u kordhin doonaa tayada adeegga isku-xirka.

#### Fiiro Gaar ah:


(J) waxaa laga soo gaabiyey Jaantus. (OFF-NET) waa wicitaannada ka baxsan shabakadda uu adeegsannayo isticmaalaha. (MTR) waa qiimaha ay shirkaduhu ku bixiyaan wicitaanada lagu sameeyo shabakadaha kale, tani waa qiimo jumlo ah.

## GUNAANAD

Sahanka adeegga isku-xirka ayaa muujinaya muhiimadda uu leeyahay adeegga isku-xirka, halkaas oo dhammaan ka qaybgalayaashu ay u arkeen in adeeggani faa'iido u leeyahay, 62% ay u isticmaaleen in ay kula xiriiraan qoyskooda iyo asxaabtooda, taasoo si cad u muujinaysa in isku xirnaantu ay tahay adeeg lagama maarmaan ah iyo faa'iido bulsho.

Caqabadda ugu weyn ee ay la kulmeen qaybgalayaashu ee ku saabsan adeegga isku-xirka ayaa ah qiimaha adeegga isku-xirka, qiimaha (MTR) ka waa 0,5 USD halka qiimaha (Off-Net) ka uu yahay 0,7 USD. Tani

# TABABARKA KORMEERKA & MAAMULKA HIRARKA



**Nofeembar, 2023**

Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), Mudane Mustafa Yaasin Sheekh, ayaa soo xiray tababar muddo 5 maalmood ah loo qabtay qaar ka mid ah shaqaalaha HIQ, kaasoo ay iska kaashadeen Machadka Sare ee Isgaarsiinta ee Afrika (AFRALTI) iyo HIQ.

Tababarkan oo ay bixinayeen khabiirro ku xeeldheer habdhaqannada ugu wanaagsan ee laga adeegsado maareynta hirarka ayaa ujeedkiisu ahaa in sare loogu qaado xirfadda shaqaalaha Hay'adda ee dhinaca maareynta, la socoshada, iyo wanaajinta isticmaalka hirarka raadiyaha (spectrum RF), iyadoo la raacayo tilmaamaha sharciyeynta iyo hubinta ka faa'iidaydiga hufan ee isgaarsiinta iyo teknolajiyada kala duwan.

Eng Jaamac Cabdi Xuseen oo ka mid ah shaqaalaha HIQ ee tababarka ka qeybgalay ayaa ugu mahadceliyey HIQ iyo AFRALTI tababarka isagoo faafaahinna ka bixiyey waxyaabihii ay ku barten "HIQ iyo AFRALTI aad baan ugu mahadcelinayaa tababarka ay inoo fidiyeen, waxaanu ku baranay maamulka hirarka (RF), qoondaynta hirarka, ruqsad siinta hirarka, kor u qaadista tayada baahinta dhijitaalka, nidaamka ogolaanshaha qalabka soo gelaya dalka iyadoo la tixgelinayo sharciga, farsamada iyo ilaalinta shuruudaha badqabka caafimaadka ee Bulshada iyo la socodka hirarka (monitoring) si looga feejignado is-dhexgalka adeega isgaarsiinta iyada oo la raacayo nidaamka ay u dejisay Hay'adda Isgaarsiinta Caalamiga ah ee (ITU) iyo Sharciga Isgaarsiinta Qaranka, sidoo kale horumarinta siyaasadda Spectrumka si kor loogu qaado Dhaqaalaha ka soo xeroonaya Hirarka Isgaarsiinta"

"Waxaanu kaloo ku baranay sidii ay shirkadaha Isgaarsiintu u wadaagi lahaayeen kaabayaasha Dhaqaalaha si ay u sahasho maalgashiga isgaarsiinta ayna u yarayso dhismaha taawarada faraha badan si loo ilaaliyo bedqabka deegaanka, arrinta wadaaga kaabayaasha dhaqaalaha waxaa asaas u noqonaya in la hirgeliyo Siyaasadda Tartanka (competition policy) taasoo abuuraysa jawi tartan oo caafimaad qaba." Ayuu intaaa kusii daray

Maareeyaha oo ka hadlay xiritaanka tababarka ayaa kula dardaarmay dhammaan shaqaalihii tababarka ka qeybgalay inay dhaqangeliyaan waxyaabihii ay tababarka ka faa'iideen " guusha tababarkan kuma xirna keliya waxaad barateen, balse sida ugu waxtarka badan ee aad u hirgelin kartaan sidaas darteed, waxaan idin kula dardaarmayaa in aqoonta aad tababarka ka hesheen ku saleysaan shaqo maalmeedkiina.





# Istaraatiijiyadda Jiilka Shanaad (5G) oo la soo Bandhigay

Sebteembar, 2023

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ayaa soo bandhigtay wadatashiga qabyo-qoraalka Istaraatiijiyadda Qaran ee Jiilka Shanaad (National 5G Strategy). Ujeeddada laga leeyahay istaraatiijiyaddan waa sidii loo carsiyeyn lahaa isgaarsiinta dalka, loolana jaanqaadi lahaa horumarrada caalamku ka sameynayo adeegyada ku dhisan internetka.

Qabyo-qoraalka Istaraatiijiyadda 5G ee Qaranka ma ahan oo keliya qorshe-howleed, balse waa aragti fog oo ka tarjumeysa sida HIQ ay uga go'an tahay inay Soomaaliya u horseeddo horumar ballaaran oo dhinaca isgaarsiinta iyo teknolajiyada ah. Qodobka ugu weyn ee ay istaraatiijiyaddani xoogga saareyso waa sidii adeegga 5G loo gaarsiin lahaa dalka oo dhan, si loo xaqiijiyo in internet qiime jaban uu u gaaro dalka oo dhan.

Iyadoo la raacayo awaamiirta Guddiga Maamulka Sare ee HIQ ee soo baxay 22-kii Sebteembar 2022, istaraatiijiyaddani waxay jeexaysaa geeddi-socod gaar ah oo loogu talagalay qoondaynta hirarka 5G iyo ahmiyadda adeegyada kale ee la xiririra 5G, waxaana arrintaasi qeyb ka ah qalabka ay dadweynuhu u adeegsadaan iyo guud ahaan ballaarinta adeegga 5G.

"Istaraatiijiyaddu ma aha oo keliya qorshe, balse waa mustaqbalkii isgaarsiinta iyo teknolajiyada ee dalka oo aan rajeyneyno inuu dalkeenu u horseedi doonto isbeddel iyo barwaaqo. Waxaan

dooneynaa in innagoo mideysan aan abuurno masiirka Soomaaliya ee dhinaca isgaarsiinta," ayuu yiri Mustafa Yaasiin Sheekh, Maareeyaha Guud ee HIQ

Wasiirka Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolajiyadda, Mudane Axmed Cismaan Diiriye, oo ka hadlay xafladda furitaanka ayaa yiri "Istaraatiijiyadda 5G ee qabyada ah waxay ka tarjumaysaa siyaasadda iyo istaraatiijiyada ICT-da ee 2019-24 ee Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolajiyada si loo horumariyo isgaarsiinta iyo teknolajiyada Soomaaliya," isagoo intaasi ku daray: "Daahfurka wada-tashigan wuxuu ku martiqaadayaa dhammaan daneeyayaasha inay soo gudbiyaan fikradahooda iyo talooyinka ku aaddan istaraatiijiyaddan."

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) oo mabda'eedu yahay inay dhageysato dhammaan dhinacyada ay khuseyso arrintan, waxay ku casuuntay dadweynaha iyo daneeyayaasha inay soo gudbiyaan aragtidooda.



## Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka

oo Diyaarisay Qorshaha Istaraatijiyada Jiilka 5aad

# 5G strategy

**Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ayaa diyaarisay qorshaha Istaraatijiyada Jiilka Shanaad National 5G Strategy) kaas oo kor u qaadaya horumarka dhinacyada isgaarsiinta, kobaca dhaqaalaha iyo halabuurka.**

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ayaa diyaarisay qorshaha Istaraatijiyada Jiilka Shanaad (National 5G Strategy) kaas oo kor u qaadaya horumarka dhinacyada isgaarsiinta, kobaca dhaqaalaha iyo halabuurka.

Istaraatijiyadan ayaa xoogga saaraysaa horumarinta iyo diyaarinta qaabab sharci oo wax ku ool ah oo u gogol xaaraysa in la dhiirigeliyo in adeegyada isgaarsiinta jiilka 5aad (5G) ay wada gaaraan dhammaan dalka iyada oo sida ugu wanaagsan looga faa'iideysanaya kheyraadka koobaan ee dalka, lana dhiirigelinayo wadaaga kaabayaasha isgaarsiinta.

Diyaarinta istaraatijiyadan waxay ku timid go'aan uu ku gaaray golaha maamulka hay'adda bishii September, 2022, oo amrayay in HIQ ay diyaariso istaraatijiyad u gaar ah hirarka iyo hirgelinta kaabayaasha teknoolajiyada jiilka 5aad

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo ka jawaabeysa isbeddelka teknoolajiyada ee dunida, waxa ay sameysay istaraatijiyad Qaran ee adeegga jiilka 5-aad (5G).

Istaraatijiyadani waa qorshe lagu howlgelinayo teknoolajiyada iyo himilada horumarinta qaranka, kobaca dhaqaalaha, iyo horumarka bulshada.

Istaraatijiyadan waxay diiradda saareysaa gaarsiinta adeegyada isgaarsiinta dalka oo dhan, wada shaqeyn dhex marta bahda ganacsatada iyo dowladda, sameynta qaab-dhismeed sharci, iyo kor u qaadidda cilmi baarista iyo hal-abuurka.

Hay'adda waxa ay sidoo kale diyaarisay qorshaha lagu xalinaayo caqabadaha ka jira adeegyada isgaarsiinta dalka, soo na jeedisay habka waaqici ah oo adeegyada 5G lagu gaarsiinaayo dhammaan dalka iyo qeybaha kala duwan ee bulshada.

## Ujeedooyinka Istaraatijiyeed

### 1 Baahinta Adeegyada Isgaarsiinta (Connectivity)

Tiirka ugu weyn ee Istaraatijiyada 5G ga waa in la gaarsiyo adeegga dhammaan dalka, magaalooyinka waaweyn ilaa tuulooyinka yaryar. Istaraatijiyadu waxa ay ay hiigsaneysaa in si siman loo helo internet xawaarahiisu sarreeyo oo la isku haleyn karo, taas oo horseedeysa is dhexgalka bulshada, fursadaha waxbarasho, iyo xoojinta dhaqaalaha, taas oo u sahleysa muwaadiniinta Soomaaliyeed in ay ka qeybqaataan dhaqaalaha dhijitaalka ah ee caalamka.

# 5G



## 2

### Kobaca Dhaqaale iyo Hal-abuurka (Economic Growth and Innovation)

Teknolojiyada 5G waxa loo arkaa in ay horseed u noqon doonto kobaca dhaqaalaha iyo hal-abuurka Soomaaliya. Istaraatiijaddu waxa ay qeexaysaa sida 5G uu kor ugu qaadi karto hal-abuurka ganacsiga, u aburi karto fursado shaqo. Teknolojiyaddan waxa ay xoojineysaa kobaca Internet-ka waxyaabaha (Internet of Things), garaadka macmalka (AI). Adeegga 5G wuxuu wax weyn ka badali doonaa beeraha, kaluumaysiga, iyo wax soo saarka. Istaraatiijiyadu waxa ay sidoo kale hoosta ka xariiqeysaa soo jiidashada maal-gashiga suuqa.

## 3

### Dejinta Siyaasadaha iyo Shuruucda (Effective Regulatory and Policy Development)

Hay'adda waxa ay diiradda saareysaa diyaarinta shuruuc iyo siyaasado fududeynaya baahinta adeegga jiil ka 5-aad, gaar ahaan nidaaminta hirarka loogu talo galay adeegga 5G, wadaagidda kaabayaasha isgaarsiinta, iyo amniga internet-ka. Istaraatiijiyadda waxa ay dhiirigelineysaa tartanka suuqa iyo hal-abuurka, iyadoo la ilaalinaayo danaha macaamiisha. Waxa ay kaloo xoogga saareysaa kor u qaadida aqoonta iyo awoodda hay'adda.

## 4

### Xoojinta Cilmi Baarista

Istaraatiijiyadu waxa ay muujineysaa muhimadda cilmi baarista iyo horumarinta (Research and Development) ee kor u qaadida teknolojiyadda 5G. Istaraatiijiyadu waxa ay kaloo xoojineysaa wadashaqeynta bahda waxbarashada ee jaamacadaha iyo xarumaha cilmi baarista, shirkadaha isgaarsiinta, iyo dowladda ee ku aaddan habka ugu habboon ee looga faa'ideysan karo adeegga 5G.

## 5

### Helidda adeeg loo dhan yahay & waaritaanka (Inclusivity and sustainability)

Yoolka ugu weyn ee Hay'adda waa in la xaqiijiyo in adeegyada isgaarsiinta ee ay ku jirto adeegga 5G uu noqdo mid loo dhanyahay oo qof walba iyo meel walba oo dalka ka mid ah uu gaaro, uu na noqdo mid waara.

## Dhisidda Kaabayaasha 5G iyo shuruucda Hageysa



Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka waxay dejisay dhammaan xeerarkii looga baahnaa in si hufan loo balaariyo kaabayaasha isgaarsiinta ee adeegga 5G ga.

Hay'adda waxa ay diyaarisay qorshe cad oo loogu talagalay qoondaynta hirarka isgaarsiinta ee adeegga 5Gga, si uu u noqdo mid ku baaha dhammaan dalka. Hay'adda waxay isku dheelitirtay baahiyaha kala duwan ee daneeyayaasha sida shirkadaha isgaarsiinta, dowladda, iyo macaamiisha.

In laga dhigo kaabayaasha isgaarsiinta ee 5G waxay

leedahay caqabado gaar ah oo la xiriira juquraafiga dalka iyo xaddidnaanta kaabayaasha isgaarsiinta ee hadda jira oo ah mid aad u kooban.

Istaraatiijaddu waxay xoogga saareysaa helidda habab leh dhowr heer oo lagu horumarinayo kaabayaasha si tartiib tartiib ah oo la gaarsiinaayo dhulka miyiga.

Sidoo kale istaraatiijiyaddu waxay dhiirigelineysaa qaabka wax-wada qeybsiga ee dowladda iyo ganacsatada (public private partnership), si kaabayaasha loo wada gaarsiyo dhammaan dalka.

# Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka

## oo ka qaybgashay Shirar Caalami ah

*Qaar ka mid ah madaxda qeybaha kala duwan ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ayaa ka qaybgalay shirar iyo kulamo caalami ah oo ka kala dhacay magaalooyinka Qaahira, Manama iyo Abu Dubai. Madaxdan aya shirarkaasi ka soo kororsday macaluumaad badan, iyagoo dhinaca kale shirarka ku biiriyay aqoontooda iyo waaqabadaka HIQ.*

**Qaahira, Masar  
Agoosto, 2023**

Xubno ka socdo Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), oo u hoggaaminayay madax waaxeedka Injineeriyadda, Dr. Khaalid Cali ayaa ka qeybgalay kulan looga hadlayay horumarinta iyo naqshadaynta hirarka qaran, kaasoo ka dhacay dalka Masar 27kii ilaa 31kii Agoosto, 2023.

Kulanka oo uu barbar socdey aqoon-isweydaarsi, ayaa waxaa soo qabanqaabiyey Midowga Isgaarsiinta Caalamiga ah qeybta u qaabilsan dalalka Carabta.

Kulankan waxaana ka soo qeybgalay dalalka Soomaaliya, Suudaan, Liibiya iyo Muritaaniya.

Inta kulanka uu socday ayaa khubarro ka tirsan ITU ay kala hadleen xubnaha dalalkaas qorshaha lagu hormarin karo, dib u eegisna lagu sameyn karo qorshaha hirarka qaran.

Sidoo kale khubarada ITU ayaa la wadaagay xubnihii shirka ka qeybgalay hababka ugu wanaagsan adduunka ee maaraynta hirarka iyo samaynta istaraatiijiyado wax ku ool ah oo loogu talagalay naqshadaynta hirarka qaran, taasoo u gaar ah qaabka u dhisan yahay isgaarsiinta wadan walba.

Kulanka ayaa ku soo dhammaaday is-faham guud oo ku saabsan muhiimadda ay leedahay iskaashiga caalamiga ah ee lagu maareynayo caqabadaha isla markaana lagu norumarinayo hirarka qaran.



# Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka

## oo ka qaybgashay Shirar Caalami ah

Oktoobar, 2023  
Abu Dubai,

Imaaraadka: Ugu dambeyntii, Madaxa waaxda Amniga Internetka ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Maxamed Xaaji Cabdulqaadir, ayaa ka qaybgalay shirka sanadla ah ee kooxda ka jawaabidda xaaladaha amniga internetka ee Ururka Iskaashiga Islaamka (OIC-CERT) kaasoo lagu qabtay 8-12 bishii Oktoober, magaalada Abuu Dhabi ee dalka Imaaraadka.

Shirka, oo ay ka soo qaybgaleen in ka badan 400 qof oo ka kala socday 70 dal iyo hay'addo caalami ah sida UN iyo INTERPOL, ayaa muddadii uu socday lagu soo badhigay heerka amniga internetka adduunka gaar ahaan khatarta dhaqaale iyo saameynta teknolojiyada cusub sida garaadka macmal ah (Artificial Intelligence) iyo sidii loo hirgelin lahaa siyaasadda iyo istiraajiyada amniga internet ka iyo sidii kor loogu qaadi lahaa wacyigelinta amniga internet ka gaar ahaan carruurta iyo in la iska kaashado ka hortaga khatarta Internetka.



Sidoo kale xubnihi Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ka socdsay ayaa waxay ka qayb qaateen tartan loo qabtay dalalka ka soo qaybgaley shirka, kaasoo ku saabsan ka hortagga iyo baaritaanka khatar amni, Soomaaliya ayaa ka gashey kaalinta seddaxaad (3aad) tartankaas kaddib markii ay soo bandhigtay aqoon iyo xirfad aad u sarreysa.

Shirkan sanadlaha ah wuxuu muhiim u yahay dhammaan Dalalka Islaamka iyo Carabta si ay uga wada shaqeyaan arrimaha amniga internetka si loo helo bulsho wacyi sare leh islamarkaana loo xoojin lahaa wada shaqeyn Amniga Internetka ee ka dhaxeysa wadamada Carabta iyo Islaamka.

# Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka

oo ka qaybgashay Shirar Caalami ah



## Shirkii 31aad ee Kooxda Maareynta Hirarka Carabta



### Manama, Baxreyn:

Dhinaca kale, Eng. Naciima Xasan, Madaxa Waaxda Isku-xirka, Qiimaha iyo Adeegga Baahsan, ayaa ka qaybgashay shirkii 31-aad ee Kooxda Maareynta Hirarka Carabta kaasoo lagu soo gabagabeeyay magaalada Manama, ee dalka Baxrayn. Ujeedka ugu weyn ee kulanka ayaa ahaa in la isu keeno dhammaan wakiillada Hay'adaha Isgaarsiinta Carabta u xilsaaran maareynta kheyraadka yar ee hirarka.

Intii shirku socday, waxaa la soo gebagebeeyey mawqifyada guud ee ay Carabtu wadaagaan ee ku saabsanaa

Ajendaha Qodobbada Shirka Raadiyaha Adduunka (WRC-23), kaasoo go'aanada ka soo baxa ay saameyn weyn ku yeelan doonaan Isgaarsiinta, Teknolajiyada, Satelite-ka, Warbaahinta iyo qeybo kale.

HIQ waxaa ka go'an maareynta hirarka dalkeenna oo ah kheyraad Qaran oo aad u yar, iyada oo la ilaalinayo xuquuqda iyo danaha dalkeenna, waxay HIQ qaadaneysa siyaasad hufan oo cusub taasoo la jaan qaadaysa mawqifka Urur Goboleedka MENA islamarkaana waxay raacaysa hababka ugu wanaagsan ee caalamiga ah.

# Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka

## oo ka qaybgashay Shirar Caalami ah



Nofeembar, 2023  
Jabuuti,

Eng Ibraahim Khaliif Maxamuud, Madaxa Waaxda Hal-abuurka, Istaraatiijiyadda & Cilmibaarista ayaa ka qeybgalay tababar ay soo qabanqaabisay Akadeemiyadda Midowga Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU) kaasoo lagu qabtay magaalada Djabuuti.

Tababarkan oo ku saabsanaa Qorshaynta Ganacsi ee Horumarinta Kaabayaasha Isgaarsiinta ee ICT-da ee Wadamada Carabta ayaa waxaa ka qeybgalay wakiilo ka kala socday Hay'adaha iyo Wasaaradaha Isgaarsiinta ee Waddamada Soomaaliya, Jabuuti iyo Yemen.

Tababarkaan ayaa isugu jiray labo weji:

**Wejiga 1-aad:** Wuxuu ka dhacay dhacay magalaada Djibouti si fool-ka fool ah, isagoo socday saddex (3) maalmood: 19-21 November 2023 iyadoo diirada lagu saarayay heerka asaasiga ee casharada (Fundamental Level).

**Wejiga 2-aad:** Waxay ka qeybgalayaashu ku qaateen qaab foggaan-arag ah, iyadoo la adeegsanayo madasha ITU Academy Portal, wuxuuna socday saddex (3) todobaad oo ka bilaabanaysa 26-ka November illaa 17 Disember 2023, iyadoo diirada lagu saaray casharrada heerka sare ah (Advanced Level).

Tababarkan, oo ay casharradiisa bixinayeen khabarro, ayaa ujeeddadiisu ahayd sidi loo sameyn lahaa qorshe dhammaystiran oo la isku hallayn karo oo ku aaddan guud ahaan hirgelinta



qorshayaasha mashaariicda kaabayaasha Isgaarsiinta. Sidoo kale, tababarku wuxuu sahminayaa dhinacyada xaaladaha kale ee ku aaddan adeegsiga satellite-ka ee gaarsiinta isgaarsiinta meelaha fogfog ama aan dad badani deganayn.

Tababarka Qorshaynta Ganacsi ee Kaabayaasha Dhaqaalaha ayaa u suurtagalinayaa xeer-nidaamiye dejiyaasha (Regulators), siyaasad sameeyayaasha (Policymakers) iyo daneenayaasha kalaba in raacaan hab sugan si saxan qiimayn dhaqaale loogu sameeyo rakibidda iyo hirgalinta qorshayaasha kaabayaasha isgaarsiinta ee ICT-da.



Nofeembar, 2023

# TILMAAMAHA Isticmaalka HIRARKA Dalka

*Hay'adda Isgaarsiinta  
Qaranka (HIQ) ayaa kulan  
wadatashi ah u qabatay  
shirkadaha isgaarsiinta dalka.  
Kulankan ayaa diiradda lagu  
saaray Tilmaamaha la xiriira  
isticmaalka hirarka.*



Kulanka ayaa waxaa ka soo qeybgalay Wasiirka Isgaarsiinta & Teknolojiyada, Md Jaamac Xasan Khaliif, Ku xigeenkiisa, Md Xuseen Axmed Culusow, Maareeyaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Md Mustafa Yaasiin Sheekh iyo Wakiillo ka socday Shirkadaha Isgaarsiinta Dalka.

Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Md Mustafa Yaasiin Sheekh, oo kulanka ka hadlay ayaa ku booriyey shirkadahi kulanka ka soo qeybgalay inay si kal iyo laab ah uga hadlaan arrimahaan isagoo yiri “Hirarka Isgaarsiinta wuxuu ka mid yahay kheyraadka xaddidan oo uu dalkeenu leeyahay, in si hufan oo beekhaamin leh loo maareeyana waxa ay saameyn toos ah ku leedahay kobaca adeegyada isgaarsiinta, marka waxaan rabnaa in aad si fiican oo mira-dhal uga wada hashaan” Isagoo intaa ku daray in hay'addu ay si caddaalad ku jirto u maareeyso.

Intii uu kulanku socday, ka qeybgalaashu waxay galeen doodo dhaxalgal ah, iyagoo muujiyey caqabadaha hortaagan qaybsiga kheyraadka yar ee Hirarka Soomaaliya, waxayna carabka ku adkeeyeen baahida loo qabo in la helo hab iskaashi iyo istaraatiijiyadeed oo wax looga qabto qondeynta hirarka. Caqabadihii ay shirkadahu tilmaameen ayaa waxa ka mid ahaa, keysashada hirarka, isticmaalka qaldan ee hirarka iyo khaladaad ka yimaada qoondada hirarka ee la bixiyey.

Wasiirka Isgaarsiinta & Teknoolojiyada, Md, Jaamac Xasan Khaliif oo kulanka soo xiray ayaa kula dardaarmay shirkadaha isgaarsiinta in ay dhowraan sharciga dalka “Caqabadda laga dooday waxa tilmaameysaa caqabadaha laga filan karo qeybta teknoolojiyadda iyo Isgaarsiinta. Waxaan uga gudbi karnaa in la wadashaqeeyo oo loo hoggaansamo shuruucyada loo dajiyay.”

Gebagabadii kulanka ayaa la isku raacay in ay shirkaduhu dhexdooda kaga wada-hadlayaan xalka ku habboon qoondeynta hirarka iyagoo kaddibna go'aan wadareed mudo cayiman kula soo wadaagaya Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.

# QORSHAHA QARAN

## ee Isgaarsiinta Xaaladaha Degdegga ah

**Nofeembar, 2023**

Dowladda Soomaaliya ayaa si rasmi ah u daahfurtay Qorshaha Qaran ee Isgaarsiinta Xaaladaha Degdegga ah. Daahfurka qorshaha waxaa ku lamaannaa aqoon isweydaarsi socday muddo 2 maalmood ah oo looga hadlayay isgaarsiinta xaaladaha degdegga ah, waxaana arrintan lagu tilmaamay inay tahay tallaabo muhiim ah oo loo qaaday dhanka xoojinta awoodaha wax-ka-qabashada musiibooyinka.

Daahfurka qorshaha oo ay ka soo qaybgaleen hay'ado muhiim ah oo ay ka mid yihiin Hay'adda Maareynta Masiibooyinka Soomaaliyeed (SODMA), Shirkadaha Isgaarsiinta, Wasaaradda Caafimaadka, Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Hoggaannada Isgaarsiinta ee Xoogga Dalka iyo Booliska, Hay'adda Tayodhowrka Soomaaliyeed iyo Ururrada Bulshada Rayidka, ayaa muujinaya dadaallo iskaashi oo lagu dhisayo nidaam isgaarsiineed oo midaysan oo waxtar u leh xilliga xaaladaha degdegga ah.

Mustafa Almahdi oo ka socday xafiiska qaabilsan dalalka Carabta ee Midowga Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU) ayaa faahfaahin ka bixiyay kaalinta ay isgaarsiintu ka cayaari karto maareynta musiibooyinka, maadaama isgaarsiintu fure u tahay la-tacaalista musiibooyinka iyo sidii waxqabad mideysan looga geysan lahaa.

Sidoo kale Maxamuud Macalin Cabdulle, Maareeyaha Guud ee SODMA ayaa ka hadlay sida uu muhiimka ugu yahay Qorshahan dhammaan dhinacyada ay khuseyso. Marka la eego u nuglaanshaha Soomaaliya ee musiibooyinku, waxa uu carrabka ku adkeeyay baahida loo qabo in la sameeyo digniino mideysan oo la xiriira xaaladaha degdegga ah.

Mustafa Yaasiin Sheekh, Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), ayaa tilmaamay muhiimadda uu qorshahani u leeyahay isu-keenida dhinacyada kala duwan ee ay khusayso. Mudane Mustafa wuxuu rajo wanaagsan ka muujiyay saamaynta baaxadda leh ee ay isgaarsiintu ku leedahay kaabayaasha guud ee wax ka qabashada xaaladaha degdegga ah, isagoo intaasi ku daray in HIQ ay si firfircoon uga qaybgelisay dhammaan daneeyayaasha intii lagu jiray diyaarinta qorshahan.

Wasiirka Isgaarsiinta & Teknolojiyada, Md. Jaamac Xasan Khaliif iyo Wasiir-dowlaha Wasaaradda, Md. Axmed Diiriye, oo iyaguna ka hadlay qiimaha uu qorshahan ugu fadhiyo dalkeena oo haatan la daalaa-dhacaya saameynta daadadka El-nino, iyagoo ugu dambeyntii u mahadceliyay khubaradii ka tirsan Wasaaradda iyo Hay'adda Isgaarsiinta ee ka soo shaqeyay qorshahan iyo kaalmada farsamo ee ITU.



# SHIRKA HORUMARINTA ISGAARSIINTA CARBEED



Nofeembar, 2023

Maareeyaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, ayaa ka mid ahaa wafdi uu hoggaaminayay Wasiirka Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolijiyada, Mudane Jaamac Xasan Khaliif, oo ka qeyb galay Shirka Horumarinta Isgaarsiinta ee dalalka Carabta, oo dhowaan lagu soo gabagabeeyay magaalada Manama ee caasimadda Baxreyn.

Madasha Horumarinta Isgaarsiinta dalalka Carabta waa madal loogu talagalay in ay ku kulmaan madaxda Isgaarsiinta dalalka Carabta si ay uga qayb qaataan doodaha iyo bandhigyada ku saabsan waxyaabaha mudnaanta u leh Gobolka Carabta. Wada-tashiyadan ayaa ujeeddadoodu tahay in lagu kobciyo horumarka dhaqaale iyo bulsho ee gobolka Carabta oo dhan.

Wasiirka Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolijiyada iyo Maareeyaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka waxay si mug leh uga qaybqaateen qaar ka mid ah doodahii madasha, iyagoo aqoontooda iyo khibraddooda ku daray doodaha socday.

Ka-qeybgalkooda ayaa hoosta ka xarriiqaya sida ay






Soomaaliya uga go’an tahay horumarinta dhijitaalka dalka Carabta iyo iskaashiga gobolka.

Intii lagu guda jiray madasha, Wasiirka iyo Maareyaha Guud waxay kulan laba-geesood ah la qaateen Wasiirka Gaadiidka iyo Isgaarsiinta Baxreyn, kaas oo ay ka wada hadleen horumarka uu dal walba ka samaynayo dhanka dhijitaalka. Labada dhinac ayaa isla gartay qodobadii ay ka wada hadleen, iyadoo lagu ballamay in la sii wado wadhadallada ku saabsan iskaashiga labada dal.


Dhinaca kale, Soomaaliya iyo Ururka Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU) ayaa madasha ku kala saxiixday heshiis iskaashi ah. Heshiiskan oo ay kala saxiixeen Wasiirka Isgaarsiinta & Teknolojiyada Soomaaliya, Mudane Jaamac Xasan Khaliif iyo Agaasimaha Xafiiska Horumarinta Isgaarsiinta ee ITU, Md Cosmas Zavazava ayaa diiradda lagu saaray horumarinta Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada Isgaarsiinta (ICT) sida: koruqaadista aqoonta ICT, diyaarinta kaabayaasha iyo sharciyada isgaarsiinta, xoojinta kaabayaasha dhijitaalka, isku-xirka iyo koruqaadista kalsoonida adeegyada dhijitaalka ah.

Hay’adda Isgaarsiinta Qaranka waxay bogaadinaysaa Ururka Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU) oo soo qabanqaabiyay madashan, taasoo fursad u siisay wafdiga inay wax ka bartaan, isla markaana ay fikradahooda is dhaafsadaan wafdiyada kale ee ku sugan madashan. HIQ waxay rajaynaysaa wadashaqayn joogta ah oo ay la yeelato ITU iyo daneeyayaasha kale ee isgaarsiinta iyo teknolojiyadda si ay u gaarto waajibaadkeeda ku wajahan horumarinta ICT-da Soomaaliya.





# Shirka Isgaarsiinta Raadiyaha Adduunka



Wasiirka Isgaarsiinta & Teknolojiyada Soomaaliya, Mudane Jaamac Khaliif, oo ay wehliyaan Maareeyaha Guud ee HIQ, Mudane Mustafa Yaasin Sheekh, iyo ku-xigeenkiisa Mudane Axmed Cali Salaad iyo la-taliyeyaal ayaa ka qeybgalay Shirka Isgaarsiinta Raaadiyaha Adduunka (WRC-23) kaasoo oo lagu qabtay magaalada Dubai.

Shirkan oo uu soo qabanqaabiyay Midowga Isgaarsiinta Adduunka (ITU) waxa uu dalalka adduunka siinayaa madal ay ku kulmaan, kaga wada hadlaan, kuna falanqeeyaan isticmaalka hirarka raadiyaha iyo wareegyada dayax-gacmeedka.

Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ayaa isaga oo ka hadlaya muhiimadda ka qeybgalka Soomaaliya ee shirkan, waxa uu yiri, "Ka qeybgalkeenna

shirkan wuxuu fursad inoo siinayaa inaan ku muujino ra'yigeena, isku dhaafsanno aqoon iyo khibrad, isla markaana gacan ka geysanno qaabeynta mustaqbalka maaraynta hirarka ee heer caalami." Maareeyuhu wuxuu intaasi ku daray in kooxda ka socota HIQ ay soo diyaariyeen hindisyaal taabanaya arrimaha hirarka ee Soomaaliya.





Dhinaca kale Wasiir Jaamac Khaliif ayaa tilmaamay muhiimadda ay Soomaaliya u leedahay ka qeybgalka Shirka Isgaarsiinta Raadiyaha Adduunka, waxaanu yiri “ka qeybgalkeenna waxa uu ka tarjumayaa sida ay nooga go’an tahay in aan hubinno isticmaalka habboon ee hirarka Raadiyaha, kaas oo muhiim u ah horumarka iyo horusocodka qarankeenna. Waxaan rajeyneynaa inaan iskaashi la sameyno dalalka kale iyo khubarada qeybta Isgaarsiinta iyo Teknolojiyadda si wax looga qabto caqabadaha iyo fursadaha ka jira arrimahan.”

Wafdigan muddada uu socday shirka waxay ka qeybqaateen doodo ku saabsan sida hufan ee looga faa’iideysan karo isticmaalka hirarka. Sidoo kale waftiga ayaa kulamo doceedyo la qaatay masuuliyiin ka socotay Ururka Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU).

Kulan doceedka koowaad waxay la qaateen Xoghayaha Guud ee Ururka Isgaarsiinta Adduunka (ITU), Marwo Doreen Bogdan-Martin. Labada dhinac ayaa ka wada hadlay xoojinta iskaashiga ka dhaxeeya Soomaaliya iyo ITU si loo hormariyo isgaarsiinta iyo teknolojiyada, iyadoo si gaar ah diiradda u saaray hirgelinta barnaamijka ITU ee dalkeenna.

Kulanka labaad waxay wafdigu la yeesheen Mudane Mario Maniewicz, Agaasimaha Xafiiska Isgaarsiinta Raadiyaha ee ITU, waxayna kala hadleen ka faa’iideysiga hufan ee hirarka ee Soomaaliya, karti-dhisidda, iyo tilmaamaha dhinacyada farsamada ee Xeer-nidaaminta Isgaarsiinta Raadiyaha.





Diseembar, 2023

# HIQ

oo soo bandhigtay


## Waxqabadkii

# 2023<sup>kii</sup>

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ayaa magaalada Muqdisho ku qabatay munaasabad lagu soo bandhigayay waxqabadkeeda sanadka 2023da, iyadoo ay goobjoog ka ahaayeen mas'uuliyiin ka tirsan dowladda, oo ay ka mid ahaayeen Wasiirka Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada, Wasiir-dowlaha Isgaarsiinta & Teknolojiyada, Wasiir ku-xigeenka Wasaaraddaas, mas'uuliyiinta iyo howl-wadeennada HIQ.

Ujeeddada munaasabadda ayaa ahayd in dib loo milicsado, isla markaana la soo bandhigo horumarradii la gaaray sanadka dhammaanaya ee 2023-da, kuwaas oo lagu horumarinayay kaabayaasha isgaarsiinta Soomaaliya.

Maareeyaha Guud ee HIQ, Md Mustafa Yaasiin Sheekh ayaa faahfaahin ka bixiyay waxyaabihii u qabsomay HIQ oo ay ka mid ahaayeen Hirgelinta Adeegga Isku-xirka Shirkadaha Isgaarsiinta, Daahfurka Qorshaha Qaran ee Isgaarsiinta Xaaladaha Degdegga ah, Dejinta Qorshaha Istiraatiijiga ah ee 2023-2027, Daah-furka Xarunta Kormeerka Hirarka, Istiraatiijiyada 5G, Hanashada Xuquuqda Soomaaliya ee Baahinta Dayax-gacmeedka Isgaarsiinta iyo kuwa kale.



# "Sanadkan sii dhammaanaya wuxuu inoo ahaa sanad aanu ku tallaabsanay guulo wax ku ool ah"

**Mustafa Yaasiin**

Maareeyuhu waxa uu sidoo kale shaaca ka qaaday qorshayaal la hiigsanayo sanadka 2024, kuwaasoo la doonayo in lagu sii horumariyo isgaarsiinta iyo teknoolojiyada dalka, kuwaas oo looga gol leeyahay baahinta adeegyada teknoolojiyada, ilaalinta xuquuqda macaamiisha, xoojinta ammaanka internet-ka, iyo sidii xeerar nidaamiya loogu sameyn lahaa isgaarsiinta iyo teknoolojiyada dalka. "Guusha aan ka gaarnay qorshayaashii aan lahayn 2023 waxay caddeyn u tahay dadaalka iyo sida ay howlwadeenadeenu uga go'an tahay horumarinta isgaarsiinta iyo teknoolojiyada dalka," ayuu yiri mudane Mustafa.

Dhinaca kale Wasiirka Isgaarsiinta & Teknoolojiyada, Md Jaamac Xasan Khaliif, ayaa ku ammaanay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka doora udub-dhexaadka ah ee ay ka qaadatay horumarka isgaarsiinta dalka, wuxuuna u ballan qaaday in ay la sii wadi doono taageerada ay dowladdu ka geysaneyso horumarinta kaabayaasha isgaarsiinta dalka. "Dowladdu waxay si buuxda u taageersan tahay dadaallada ay waddo Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, taasoo wax weyn ka tari doonta horumarka isgaarsiinta dalkeena," ayuu yiri Wasiir Khaliif.

Xafladda ayaa sidoo kale abaalmarinno lagu guddoonsiiyay qaar ka mid ah shaqaalaha HIQ, kuwaas oo muujijay dadaal iyo waxqabad heer sare oo ay kaga qeybqaateen guulaha ay hay'addu ku tallaabsatay sannadkii 2023.

# Maxaa Inoo Qabsoomay **20** *Sanadkii Tegay* **23<sup>kii</sup>**



**Mustafa Yaasiin**

**HIQ oo heshey Shahaadada  
Caalamiga ah ee ISO 9001:2015**


**Qabashada madashii ugu horreysay  
ee Amniga Internet-ka Soomaaliya**

**Qorshaha HIQ ee 5ta sano  
2023 - 2027 oo la diyaariyay**

**Dejinta Istaraatijiyadda Jiilka  
shanaad (5G) ee Qaranka**

**Shabakadda Hay'adaha Isgaarsiinta  
Carabta oo aan xubin ka noqonnay**

**Isku-xirka Adeegga Shirkadaha  
Isgaarsiinta oo lagu guuleystay**





Warsidaha  
**ISGAARSIIN**

**Cinwaan:**

- @ : [info@nca.gov.so](mailto:info@nca.gov.so)
- 🌐 : <http://www.nca.gov.so>
- f : Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka
- 🐦 : @SomaliaNCA